

WASAARADDA WAXBARASHADA HIDDAHA
IYO TACLIINTA SARE

IMTIXAANKA FASALKA 4AAD. 2009

AF-SOOMAALI



XAFIISKA IMTIXAANKA IYO SHAHAADADA PUNTLAND



Magac:

Dugsi:

Rool Lambar:

Maamul Goboleedka Puntland

Wasaaradda Waxbarashada

Xafiiska Imtixaanka

Fasalka 4aad Dugsiga sare

Imtixaanka Af Soomaaliga

2009

Amin: 2 saac

Lagu daray 10 daqiiqo oo warqado akhris ah

Tilmaamaha imtixaan-galaha:

Waxaa imtixaanku ka kooban yahay **16 bog**. Bogga labaad waa feegaar lamana saxayo wixii lagu qoro. Tiri, hadday wax ka maqan yihii ilaaliyaha u sheeg.

Wuxuu imtixaanku ka kooban yahay 8 qaybood oo kala ah sidaan:

- | | | |
|-------|--------------------------------------|---------------|
| I. | Akhris (gobo geli iyo su'aalo) | (20 dhibcood) |
| II. | Hees hawleed | (08 dhibcood) |
| III. | Maah maahyo | (10 dhibcood) |
| IV. | Gabayo | (12 dhibcood) |
| V. | Googaalaysi | (05 dhibcood) |
| VI. | Naxwe | (10 dhibcood) |
| VII. | Aqoon Guud | (10 dhibcood) |
| VIII. | Curisyo | (24 dhibcood) |

WADAR**(100 dhibcood)**

- Ka jawaab su'aalaha oo dhan
- Ku qor jawaabaha iyo shaqada oo dhan meelaha laguu banneeyey
- Wixii feegaar ah ku qor bogga labaad. Lamana saxayo bogga labaad
- Warqad dheeri ah lama ogola
- Aalad qoraal ama xisaabeed lama ogola
- Hadaad qalad sameeyso, isku tallaab ku dhufo dabadeedna ku qor jawaabta meesha lafteeda. Qallin wax lagu saxo lama ogola.



BOGGA FEEGAARKA

SHEEKO: Akhri sheekadaan kana jawaab su'aalaha I, II & III

Laba nin ayaa socdaal galay. Waxa ay hiyaga ku xireen inay u kacaan masaafo aad u fog. Waa tub dheer oo dhawr minqaad loo soconayo halkay u kicitimeen. Carradu markaa waa oommane, waana diraac jiilaalku dheeraaday dabaadigeed.

Degsiimadu geyiga kuma badna, markay gelin wax ku dhow socdaanba, waxaa laga yaabaa inay jees meel deggan arkaan. Cid kasta oo meeshaas socdaal ku gasha haddaysan sahay iyo biyo qaadan oonka iyo gaajada ayey halis u tahay, khatarta subaacuna waa u dheer tahay. Labada nin mid baa haweentiisii waxay kiish ugu ridday sarar kumbis ah. Midka kale waxaa haweentiisu good ugu gunuday xoogaa salool ah. Ninba ninka kale waxa uu sito war uma hayo.

Safar ayey isu qalqaaliyeen. Markuu waaberigu soo dhow yahay ayey si fiican u hamuun tirteen. Waa jarmaadeen si ay qaboonada dhulka intiisa badan u dhaafaan. Waxay socdaanba, harka galay bay geed hooskiisa xoogaa isku tuureen, wax qumman intaanay jiifin bay ka tooseen, waxayna tukadeen salaaddii duhur. Markay duceysteen way ka dhallandhooleen, kuleylka qorraxdu marka uu jabo inay roonaan lahayd way ogyihii, haseyeeshee, waxay u hor mareen inaysan caawa gaajo iyo oon magan u noqon, dugaagga u loogmin. Bisinka inta ay qabsadeen bay jidka laba ka dhiggen. Afar baqdinood oo kala daran baa markaas haysey, tan dambese u daran tahay. Socodkooda orod, gucle iyo mid caadi ah ayuu isugu jiray. Halista koowaad waa gudcurka, tan labaad waa halista subaaca, saddexaad waa halista cidlada iyo halista gaajada iyo oonka. Galabtii oo dhan cag ma ay dhigin, mar ay kortag ama salaad u hakadeen mooyee. Goor aasku madoobaanayo ayaa nasiib wanaag cid yabaqeedu u baxay. Neef weyn ayaa ka soo kudday aad ayeyna u rayreeyeen. Waxay galeen Alla tuug waxaana ay yiraahdeen "Allahayow reer khayr nooga yeel". Intii ay duceysanayeenba waxa ay soo galeen ciddii. Waa beel duddo ah oo ka kooban ilaa iyo lix qoys oo wada taal. Waxaa u muuqday nin heeraarka fagaagga ka horeeya taagan. Socotadii baa ku soo bayrtay ninkii waxayna ku dhaheen "Asalaamu calaykum", ninkii baa ku jawaabay "wa calaykuma salaam". Wareysigoodii wuxuu u dhacay sidatan:

Socotadii nin ka mida ayaa yiri "aqoonma"? Ninkii cidda ka mid ahaa ayaa ugu jaawaabay "idin garan mayo". Annagu niman reer Carraale ah baanu nahay", waxaa yiri socotadii mid ka mida. "oo maxaa la idin yiraahdaa"? kii wareysanayey ayaa sii weydiiyey. Aniga Gabood baa la l yiraahdaa, ninkanna Guure ayaa la yiraahdaa ee idinna? "Anigu waxaan ahay nin reer Cigaal ah magacaygana waxaa la yiraahdaa Faahiye ee maxaad sheegteen?

Midkii socotada u hadlayey Gabood ayaa yiri "mid badan iyo belo toona ma sheegin, waxaanu u habeen seexanay gaadaashaa saantayadu ka soo jeeddo, inta aanu ognahay cawo-bari, dalna weyn oo wax jira Allaa og. Sidaa iyo war yaridaa. Waa sida" Idinku maxaad sheegteen? Ninkii cidda ka mid ahaa Faahiye ayaa yiri. "War war baa la dhaafshaaye calaankii ma haynno – dhibaato jiilalka ka weyn ma ogin, ninkeed dhibase meel walba waa taal." Midda hadda ugu daran waa biyo la'aan. Jiilalkii intuu dheeraaday ayey ceelashii dawreen oo biyo laga waayey. Intuu ninku

warramayey Gaboodna waa ka gurayey, oo waxa uu lahaa weeye, wed ka durug, beerka ha u dhiman, iwm.

Markii iswareysigii dhammaaday waxaa soo gashay salaaddi maqrib waxaana la guda galay tukashadii. Markii la wada tukadey, ayuu Faahiye xaggii oosha u dhaqaaqay wuxuuna soo qaaday dhambaal yar iyo qori dab leh. Geed durruje (Qurac gaaban) ah gabbaadkii ayuu u dhigay dhambaashii, dabkiina waa u huriyey. In yar ka dib waxa ay la daateen hurdo illeyn maanta oo dhan bay joogejooge ahaayeene. Goor dambe oo caweysinkii ah buu ninkii Faahiye wuxuu u keenay martidii caano laba nin oo caadi ah ku filan balse Gabood iyo Guure ka yar, waayo waa niman cirweyn maanta oo dhanna qatanaa. Gabbaantii bay isu cantuugeen oo haantii oo maran xagga iskaga tureen. Waxa ay tukadeen salaaddii cishaha, hurdana dib ugu laabteen. Marka nin salaad jeceli tooso ayey kaceen kabahoodana horey ka illadeen, waddadana cagta saareen – si ay inta habeenku isku jiro masaafo dheer u jaraan. Waxa ay socdaan iyo waxa ay socdaanba barqo dheer ayey ili-ku-wareertay aqallo uga muuqdeen. Markii ay aqalladii arkeenba wixii hayaba waa daayeeen: hadduu daal ahaa, gaajo ahaa iyo hadduu harraad ahaaba. Hadda wax kale yeelkoode biyaha ayaa ugu daran. Wax ay ka dayrinayaan baanse jirin. Markii ay aqalladii soo gaareen “war yaa jooga” nin socotadii ka mida baa yiri. “waa la joogaa” haweeney guriga ku jirta ayaa ku warcelisey. “War nafta nagu qabta biyo iyo baad waa dhicsaalanehee” nimanka midkood ayaa yiri. Haweeneydii inta ay hagoogatay ayey dibadda u soo baxday. Markii ay aragtay diifta ragga ka muuqata ayey guriga dib ugu laabatay, waxayna ku fidisay salli aqalka gudhiisa. “war soo gala” ayey ku tiri nimankii. Waxay markiiba higaaggaa ka furtay haan biyo qarroor ahi ku dambeeyeen, oo carruurta loo dhawrayey inta dhaanku ka soo gaarayo. Midba kalax muggiis ayey ku curquuntay, dabadeedna haan caano dhito oo ay odaygeeda la dhawraysey ayey midba haruub uga milaashay. Markay in yar jilib-caraysteen, salaaddii duhurna tukadeen ayey hore uga boqooleen. Galabtaas oo dhan carraabo ayey ahaayeen, wax cid ah indho ma saarin. Goortii habeenku dumay, daalna ay la tiicayaan, asay dayax neylo qaada tahay. “war ma iska nasanaa intii cabbaar ah, Gabood baa yiri. “Anna waa ila tahay”, Guure ayaa yiri. Ninba meel bannaan oon dhir lahayn buu wiiqa dhigay. Markay xoogaa jiifeen buu nin waliba wuxuu is yiri kii kale seexay ee sahaydaadii yarayd cun. Waxay ku war heleen iyagoo labadooduba soo jeedaan, mid waliba uu maradiisa hullaban yahay, Gabood wuxuu haystay sarar buuran oo kumbis ah, Guurena wuxuu haystey salool. Gabood wuxuu damcay ninka sararta wax ka sii, wuxuuna yiri “war Guure wax ma haysataa?” Wuxuu Guure ku jawaabay haa. “War anna wax baan hayaaye keen isku wadaagnee” ayaa Gabood u ceshay. “Waxba wadaagi meyn ee waxaagu ha ku deequeen” ayaa Guure ugu warceliyey. Gabood ayaa yiri “**ninba wax la hullaabban.**”

Ka jawaab su'aalahaan dhammaantood

- I.** **Goobo geli xarafka jawaabta saxa ah:** **(5 dhibcood)**
1. Nimanka safarka wada galay waxay kala ahaayeen **(1 dhobic)**
 - a) Cali iyo Faarax
 - b) Cumar iyo Jaamac
 - c) Gabood iyo Guure
 2. Waxay reerohooda ka tageen xilli: **(1 dhobic)**
 - a) galab ah
 - b) fiid ah
 - c) aroor ah
 3. Habeenkii waxay u hoyden reero **(1 dhobic)**
 - a) Jees ah
 - b) Laba qoys ah
 - c) Duddo ah
 - d) Cidla'
 4. Maalintii koowaad ma arag **(1 dhobic)**
 - a) dad iyo duunyo toona
 - b) Waxay heleen geel-xeraad
 - c) Waxay heleen cido reer ari ah
 5. Maalintii labaad waxay heleen **(1 dhobic)**
 - a) Reer lo'aad
 - b) Jees meel yaal
 - c) Ugaar iyo baadi
- II.** **Ka jawaab su'aalahan**
1. **Keen erayadaan kuwo la macnaa** **(5 dhibcood)**
 - a) Tub _____ **(1 dhobic)**
 - b) Minqaad _____ **(1 dhobic)**
 - c) Jiilaal _____ **(1 dhobic)**
 - d) Sahay _____ **(1 dhobic)**
 - e) Dhalandhool _____ **(1 dhobic)**
 2. **Qor erayadaan kuwa lidkooda ah** **(5 dhibcood)**
 - a) Galab _____ **(1 dhobic)**
 - b) Gaajo _____ **(1 dhobic)**



SOM EXAMS

- c) Nur _____ (1 dhobic)
- d) Gaawe _____ (1 dhobic)
- e) Duddo _____ (1 dhobic)

III. Ka jawaab su'aalahaan adoo dib u fiirinayaa sheekada. (5 dhibcood)

1. Qor cinwaanka ku habboon sheekada (2 dhibcood)

2. Soomaalidu soo dhoweynta iyo martigelinta way ku fiican tahay.

Waxaa markhaati kaaga ah in sheekadan hooyo loo soo hargalay ay siisay martidii qarroorkii yaraa ee carruurteeda ay ku ilaalinaysay iyo xoogaagii dhitada ahaa ee odageeda ay u dhigtay. Maxay haddaba ku dhacday in labada oday saloolka iyo sarar shiilan kala qarsadaan iyagoo safar ku wada jira ee aan wehel kale haysan? Sabab fiican u samee jawaabtaada.

(3 dhibcood)



Magaca hees hawleedka joog u taxa B ku aaddi hees hawleedka joog u taxa T adoo raacaya tusaalaha hoos ku qoran.

B

1. Hees shubaal
2. Salsal
3. Hees carruureed
4. Hees lo'aad
5. Hees geel

T

- B. Ma dhaankii baa arooray aroorood oon ku raagtay.
- T. Wadaan weyn tolo walaalna u waa waa wax yaab lehe waqow kaa magan.
- J. Wiil aan Waayeel waayo maalini wadaanteediyo wiil iskama rogo.
- X. Adigana gartaa weeyoo geelaagii baa tegey, aniga gartay weeyoo gaadiidkaygii baad noqotay.
- KH. Wanaagsane Waris wayl uu xalay dhalay wiil la moodyoo walqal lala dhamac.

Ku qor jawaabta halkaan adoo raacaya tusaalaha:

- | | |
|--------------------------|---------------------|
| 1) Hees Shubaal ----- | T |
| 2) Salsal ----- | (2 dhibcood) |
| 3) Hees carruureed ----- | (2 dhibcood) |
| 4) Hees lo'aad ----- | (2 dhibcood) |
| 5) Hees geel ----- | (2 dhibcood) |

QAYBTA SADDEXAAD: MAAHMAAHYO
(10 dhibcood)

Erayada soo socda mid walba ku hor qor maahmaah ereygu ku jiro.

- 1) Fardaha: _____ **(2 dhibcood)**
- 2) Sagaarada: _____ **(2 dhibcood)**
- 3) Xoolaha: _____ **(2 dhibcood)**
- 4) Dameeraha: _____ **(2 dhibcood)**
- 5) Dan: _____ **(2 dhibcood)**

QAYBTA AFRAAD: GABAYO
(12 dhibcood)
A. Akhri tuducyada hoos ku qoran ee uu tirihey Cali Xuseen (Ma kaadsade)

kana jawaab su'aalaha ka dambeeya.

Waxay tiri inkaar buu ku go'ay odagii Soomaali

Awlaadii uu dhalayna waa sida adoogoode

Hadday ul iyo diirkeed noqdaan rag iska eegaaya

Afrikaba ma joogeen nimaan aabbe ku lahayne

Ayax kuma dhaleen keymihiib ubaxa weynaaaye

Anna aydii aan joogi jiray kama abraareene

Waxaan iri irdihii nalaga qaad aad ahaan jiraye

Waa taa la kala iibsadaan nala ogeysiine

Ooddaaba laga goynayaa idanka Laasoode

Meeshaad ilmaha dhigan lahayd uun kalaa degaye

1. Sharax weeraha hoos ku qoran oo gabayga laga soo saaray (4 dhibcood)

b. Aydii aan joogi jiray: ----- (2 dhibcood)

t. Uun kalaa degaye: ----- (2 dhibcood)

B. Ka faalood waxa uu ula jeeddo abwaan Cali Xuseen oraahaha soo socda

(8 dhibcood)

b. Hadday ul iyo diirkeed noqdaan rag iska eegaaya. -----

----- (2 dhibcood)

t. Ayax kuma dhaleen keymihiib ubaxa weynaaaye. -----

----- (2 dhibcood)

j. Meeshaad ilmaha dhigan lahayd uun kalaa degaye. -----

(2 dhibcood)

x. Afrikaba ma joogeen nimaan aabbe ku lahayn ayuu yiri abwaanku. Mid hooyadiis Afrikaan tahay ma u ogol yahay inuu Africa joogo? Sababee jawaabtaada. -----

(2 dhibcood)

QAYBTA SHANAAD: GOOGAALAYSI

Sheeg weeraha googaalaysiga ah ee soo socda waxa loola jeedo. (5 dhibcood)

b. Aqal wada aleelaysan. -----

(1dhibic)

t. Silsilad qubatay sidee loo guraa? -----

(1dhibic)

j. Dudumo hoosteed duumo kugu legeddey. -----

(1 dhibic)

x. Awr madoobe abaar qooq. -----

(1 dhibic)

kh. Arigayaga xeradiisu waa wada ul oo ul la qaato ma leh. -----

(1 dhibic)

QAYBTA LIXAAD. NAXWE

(11 dhibcood)

B. Akhri weerahaan soo socda, kana jawaab su'aalaha ka iman doona.

(5 dhibcood)

1. Guuleed waa arday dhigta fasalka afraad ee dugsiga sare. Ka soo saar
weertan (weedhan) magaca “gaar” ee ku jira. -----

(1 dhibic)

2. Faarax ama Jaamac baa imanaya. Ka soo saar weedhaan xiriiriyaha ku jira. --

(1 dhibic)

3. Anigu waxaan ahay bare. Ka soo saar weedhaan magac u yaalka ku jira. -----

(1 dhibic)

4. Kooshin waa wiil dheer. Ka soo saar weedhaan tilmaamaha ku jira. -----

(1 dhibic)

5. Cali wuxuu akhriyayaa buug. Ka soo saar weedhaan labada fal ee ku jira. -----

(1 dhibic)

T. Wadar ka dhig erayadaan kelida ah. U fiirso tusaalahaan hoose (6 dhibcood)

Tusaale: Wiil → **Wiilal**

b. Gabar	→	-----	(1 dhibic)
t. Fure	→	-----	(1 dhibic)
j. Waran	→	-----	(1 dhibic)
x. Qoys	→	-----	(1 dhibic)
kh. Far	→	-----	(1 dhibic)
d. Xiddig	→	-----	(1 dhibic)

QAYBTA TODOBAAD: AQOON GUUD (10 dhibcood)

B. Saar ereyga silloon. Ereyga ka nooc duwan shanta erey ee jiif taxa isula socda xariiq dhex mari, ka dibna ku qor meesha loo banneeyey. Raac tusaalaha hoose.

(2.5 dhibcood)

Tusaale: Soomaaliya Keenya Jabuuti Itoobiya Afrika

----- Afrika -----

1. Gaalkacyo Qaboono Garoowe Boosaaso Qardho (1/2 dhibic)

2. Qurac Qansax Qaydar Qaylo Maygaag (1/2 dhibic)

3. Libaax Gorgor Tuke Fiin Goroyo (1/2 dhibic)

4. Akhri Kac Qor Taagnaan Maqal (1/2 dhibic)

5. Dhuuban Gaaban Keen Buuran Fiican (1/2 dhibic)

T. Xarfahaan isdhex yaacsan ka soo saar eray saxa. Raac tusaalaha.

(2 1/2 dhibcood)

Tusaale: a n a n a n o x = Xannaano

1. d n i a g a r a d (1/2 dhibic)

2. h o b o l o w y (1/2 dhibic)

3. b i r a n a r a b (1/2 dhibic)

4. s i d a d a c a (1/2 dhibic)

5. o y l a c e l e (1/2 dhibic)

C. Ku hor qor gobol kasta magaalo madaxdiisa. Raac tusaalaha hoos ku

qoran. (2 1/2 dhibcood)

Tusaale: Jubada Hoose ----- Kismaayo

1. Bari ----- (1/2 dhibic)

2. Nugaal ----- (1/2 dhibic)

3. Hiiraan ----- (1/2 dhibic)

4. Bakool ----- (1/2 dhibic)

5. Sool ----- (1/2 dhibic)

D. Ku hor qor degma kasta gobolkeeda. Raac tusaalaha hoose.

(2 1/2 dhibcood)

Tusaale: Caluula ----- Bari

- | | |
|--------------------|---------------------|
| 1. Badhan ----- | (1/2 dhibic) |
| 2. Galdogob ----- | (1/2 dhibic) |
| 3. Bayla ----- | (1/2 dhibic) |
| 4. Buuhoodle ----- | (1/2 dhibic) |
| 5. Luuq ----- | (1/2 dhibic) |

QAYBTA SIDDEEDAAD: CURISYO (LABO) (24 dhibcood)

B. Labadaan mowduuc mid ka dooro, ka qor ugu yaraan **25 sadar midka aad doorato. Qurxinta farta, isku xirka, qaab dhismeedka, adeegsiga erayada, iyo murtida iyo figradda sida qoraalku hodan uga yahay ayey dhibcihiisu ku xiran yihiin haddii Allaah idmo.**

(12 dhibcood)

1. Dhibaatada qaadku ku hayo bulshada Soomaaliyeed

Ama

2. Sidee looga yareyn karaa cunista qaadka bulshada Soomaaliyeed?





T. Labadaan mowduuc mid ka dooro, ka qor ugu yaraan **25 sadar** midka aad doorato. Qurxinta farta, isku xirka, qaab dhismeedka, adeegsiga erayada, iyo murtida iyo figradda sida qoraalku hodan uga yahay ayey dhibcihiisu ku xiran yihiin haddii Allaah idmo.

(12 dhibcood)

1. Muhiimadda biyuhu u leeyihiin noolaha gaar ahaan aadamiga.

Ama

2. Faa'iidooyinka runtu leedahay adduun iyo aakhiraba.



